Oggolaansho degenaansho

Oggolaanshaha degenaanshuhu (degenaansho joogto ah) wuxuu siinayaa xaq ah joogitaan waara iyo ka shaqeysasho Norwey. Oggolaanshuhu kuma xidhna muddo xadidan sidaa darteed looma baahna in la cusbooneysiiyo.

Waxaad heli kartaa oggolaansho degenaansho kadib markii aad Norwey u deggeneyd si isku xigta saddex sano adiga oo heysta oggolaansho joogis – ama shaqo kaas oo lagugu siiyey iyadoo laga fekereyey inaad joogi doonta waddanka muddo dheer isla markaana gundhig u ah oggolaansho degenaansho. Taasi waxay khuseysaa dadka loo oggolaaday qaxootinimada, magangelyada sabab bini'aadannimo darteed, joogitaan ilaalin guud, qoys isukeenis iyo oggolaansho shaqo oo lagu bixiyey sida qof xirfad/takhasus leh. Waxa inta badan si cad ogolaanshaha loogu muujinayaa inuuu gundhig u noqon karo degenaansho iyo in kale.

Si loo ogolaado codsi ku saabsan oggolaansho degenaansho waa in la buuxiyo shuruudaha oggolaanshaha aad weli heysato marka aad codsaneyso oggolaansho degenaansho .

Haddii aad u dhalatey waddamada EU/EØS/EFTA oo aad rabto inaad codsato oggolaansho degenaansho, waa inaad buuxiso shuradahaas oo kale. Taa macnaheedu waxa weeye haddii aad rabto inaad codsato oggolaansho degenaansho waa inaad lahaato oggolaansho u noqoneysa gundhig oggolaansho degenaansho (Oggolaanshaha shaqo ama joogitaan ee lagu heley iyada oo la adeegsanayo sharciyada EU/EØS/EFTA uma noqoneyso gundhig in la helo oggolaansho degenaansho).

Haddii lagu siiyey oggolaansho degenaansho, ma lumin kartid xataa haddii sababtii asalka aheyd ee markii hore lagugu siiyey joogista - ama oggolaanshaha lagu shaqeysto ey meesha ka baxdo, sida tusaale ahaan shaqo la'aan ama furniin.

Marka aad codsaneyso oggolaansho degenaansho, waa inaad soo xareyso waraaqahan (dokumenter) hoos ku xusan:

- Codsi iyo sawir
- Koobiga baasaboorka (iyo koobiga b/booro hore haddii aad haysatey basabooro badan
- intii aad haysatey oggolaanshaha shaqada ama oggolaanshaha joogitaanka ee Norwey)
- Warbixin ku saabsaan dhoofitaankaaga saddexdii sano ee ugu dambeeyey

Marka aad codsato oggolaansho degenaansho waxa boosta laguugu soo dirayaa farriin otomaatik ah oo sheegeysa in mas'uuliyiinta ajinebigu ey heleen codsigaaga. Farriinta waxa aad ka heleysaa warbixin ku saabsan muddada ey qaadaneyso ka baaraandeggidda codsiga.

Haddii aad dooneyso inaad Norwey ka dhoofto kaddib marka lagu siiyo oggolaanshaha degenaanshaha, waa in baasaboorka laguugu dhejiyo ciqaamad. Ciqaamadu waa caddeyn ah inaad heysato oggolaansho degenaansho waxaana laga cusbooneysiin karaa oo keliya booliska. Cusbooneysiinta waxa la sameeyaa iyada oo shakhsiyan loo yimaado booliska loomana baahna codsi.

Xeerka guud waxa weeye inaad lumineyso oggolaashaha degenaanshaha haddii aad degenaato labo sanadood oo isku xiga meel ka baxsan Norwey, ama in ka badan marka la isku daro labo sanadood muddo afar sanadood gudahood ah. Marar dhif ah waxaad codsan kartaa inaad heysan karto oggolaanshaha degenaansho haddii aad rabto inaad joogto in ka badan labo sanadood meel ka baxsan Norwey. Waa inaad tan markaa codsato waqti fiican kahor inta aaney labada sanadood ee ugu horeeyaa ee aad joogeyso waddan debedda ah kaa dhicin.

Laga reebo mararka qaarkood waxa jira shuruudo khuseeya dadka heley oggolaanshaha shaqo ama joogitaan ee ugu horeeyey kadib 01.09.2005 oo ah in la soo dhameystey barashada af-noorwiijiga. Dadka heley oggolaanshaha shaqo ama joogitaan ee ugu horeeyey kahor waqtigan sida sharciga guud ah ma khuseyso shuruudaasi.

UDI
Norwegian Directorate of Immigration

Sua'aalo caadi ah

Goorma iyo xaggee ayaan ka codsadaa?
Codsiga oggolaanshaha degenaansho waa inaad geysaa xafiiska booliiska Norwey degmada aad joogtid ugu dambeyn bil ka hor inta aanuu kaa dhicin oggolaanshaha joogista – ama shaqada. Marka aad codsiga gudbiso wakhti sax ah waxaad xaq u leedahay inaad sii joogtid Norwey si la mid ah sidii isla shuruudahii hore, ilaa inta arrintaada go'aan laga gaadhayo.

Wakhti intee le'eg bay qaadataa in laga baaraandego codsigeyga?
Muddada ka baaraandeggiddu wey kala duwan tahay. Eeg bogga internetka ee UDI (www.udi.no) ama la xidhiidh xafiiska hawlaha wargelinta ee UDI wixii ku saabsan wararka cusub oo ah norwiiji iyo ingiriisi.

Ma kharash ayey ku fadhidaa in la codsado oggolaansho degenaansho?
Kharashka in la codsado oggolaansho degenaansho waa 1600 oo norwegian koroone ah. Kharashka waxaad bixineysaa marka aad codsigaaga booliska ka xareyneyso (naqad/kaadh). Sidoo kale kharashka waa la sii bixin karaa (xisaabta oo laga bixiyo) dabadeed waa in risiidhka lagu lifaaqo codsiga, ama codsiga ha lagu diro boosta amaba qofku isagu ha xareeyo. Nambarka bangigooda waxa laga heli karaa booliska, lacagta waxa la siinayaa booliska ee lama siinayo UDI.

Haddii codsiga laga xareynayo Oslo, waxa telifoon loo diri karaa Booliska qeybta ajinebiga si loo helo nambarka koontadooda. Nambarka telifoonka booliska ee Oslo waa 22 34 21 00

Cabasho ma ka qaadan karaa go'aanka?
Haa. Haddii aad cabasho ka qaadatid, waxaa cabashadaada si cusub u eegeysa UDI, haddii ay UDI wax ka bedeli weydo go'aankeedii hore waxa markaa cabashada loo sii gudbinyaa guddiga cabashada arrimaha ajinebiga (UNE). Eegidda cabashadaan waa bilaash (lacag la'aan).

Shuruudehee la iiga baahan yahay inaan buuxiyo?
Waa inaad sida sharciga guud dhigayo aad deganeyd Norwey si isku xigta saddex sano adigoo haysta oggolaansho joogis – ama shaqo sax ah oo aan xad laheyn. Oggolaanshuhu waa inuu gundhig u noqonayo oggolaansho degenaansho. Waxa laga digayaa in duruurfaha qaar loo baahan doono in ka badan saddex sanadood oo halkan la degenaado, waxa tusaale tan ka mid ah haddii lagugu xukumey dembi aad gashay.

Si isku xigta waxaa loola jeedaa in in la heysto ogolaansho isku mid ah saddexda sanadoodba iyo in shuruuradaha ogolaanshaha ee waqtiga oo dhan la buuxiyo. Waa ineyna jirin waqti aanaad heysan ogolaansho ("ku dhaafey") kaas oo marka la isku daro ka badan saddex bilood inta lagu gudo jiro mudada saddexda sanadood ah. Waqtigan ku dhaafey waxa laga xisaabinayaa marka ogolaanshuhu dhacey ilaa inta codsiga cusbooneysiinta laga xareynayo.

Intaa waxa dheer in aadan joogi karin in ka badan toddoba bilood meel ka baxsan Norwey dibeddeeda saddexdii sano ee ugu dambeeyey. Kooxaha codsadayaasha qaar ka mid ah wey joogi karaan meel Norwey ka baxsan ilaa 15 bilood iyada oo aan xuquuqda ah in la siiyo degenaanso aaney ka baaba'eyn. Tani waxey khuseysaa dadka heysta ogolaanshaha shaqo ee xirfadlayaasha iyo dadka heysta ogolaansho shaqo sababta oo ah waxa lagu shaqaaleysiiyey sida professor ama jago kale oo ah cilmi (ogolaanshaha waxa lagu bixiyey iyada oo loo eegayo qiilka ajinebiga ee § 3 qeybta koowaad xarfaha a ama d). Waa xaaladahan kuwa lagu xidhayo in aan safarada gaarka ahi ka badan todoba bilood iyo in socdaalada hadheyna ey yihiin kuwo ey keeneen shaqo uu ku direy shaqobixiyuhu.

Laga reebo mararka qaarkood waxa jira shuruudo khuseeya dadka heley oggolaanshaha shaqo ama joogitaan ee ugu horeeyey kadib 01.09.2005 oo ah in la soo dhameystey barashada af-noorwiijiga. Dadka heley oggolaanshaha shaqo ama joogitaan ee ugu horeeyey kahor waqtigan sida sharciga guud ah ma khuseyso shuruudaasi.
Shuruudu waxey khuseysaa oo keliya codsadayaasha ah iney dhameystaan barashada af-noorwiijiga ee waajibka ah marka loo eego xeerarka sharciga hordhaca.

Taariikhdee ayaa laga tirinayaa muddada deganaanta?
Caadi ahaan waxaa laga tiriyaa laga bilaabo taariikhda lagu siiyey oggolaanshahaaga ugu horreeya. Haddii oggolaanshaha lagu siiyey intii aadan Norwey iman ka hor, waxaa laga tirinaya muddada deganaanta laga soo bilaabo wakhtigii aad iska xaadirisay boliiska markaad timi waddanka ka dib. Qaxootiga loo oggolaado magangelyo wuxuu ka bilaabayaa tirada maalintii uu codsadey qaxootinnimada.
Qaxootiga la siiyo oggolaansho sabab bini'aadannimo darteed wuxuu ka tirsanayaa taariikhda oggolaanshaha

The Norwegian Directorate of Immigration
P.O. Box 8108 Dep.
N-0032 Oslo
Office address: Hausmannsgate 21

Phone: +47 23 35 15 00
Fax: +47 23 35 15 15
www.udi.no
E-mail: udi@udi.no

Last updated: 30.05.2007

la siiyey. Haddii sababtii ogolaanshahaaga lagu bixiyey wax iska bedelaan, ama ey ku soo mareen waqtiyo aan sababta ogolaanshuhu khuseynin, sida caadiga ah wuxuu waqtiga degenaanshuhu si cusub uga bilaabmayaa laga bilaabo waqtiga dambe ee aad ogolaanshaha ku heshey sababta dambe, bedel ahaan laga bilaabo waqtiga ey sababta dambe meesha timi.

Ma lumin karaa oggolaanshaha degenaanshaha?
In kasta oo uu oggolaanshaha degenaanshuhu ku siinayo xaq ah joogitaan waara, waxa shuruud ah inaad Norwey degenaato. Haddii adiga oo heysta oggolaanshaha degenaanshaha Norwey aad deggan tahay dal dibedda ah in ka badan laba sano, waad lumineysaa markaa oggolaanshahaaga. Marar dhif ah waxaad codsan kartaa inaad heysan karto oggolaanshaha haddii aad heysato sabab macquul ah inaad ku noolaato meel kale oo dibedda ah muddo dheer.

Ma qabtaa weli wax su'aalo ah?
Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan xeerarka, waxaad la xidhiidhi kartaa saldhigga booliska ee kuugu dhow. Waxa kale oo aad la xidhiidhi kartaa xafiiska hawlaha wargelinta ee UDI, telefoonka(+47) 23 35 16 00, e.post ots@udi.no. ama eeg bogga www.udi.no warbixin dheeraad ah oo ah norwiiji ama ingiriisi.

The Norwegian Directorate of Immigration
P.O. Box 8108 Dep.
N-0032 Oslo
Office address: Hausmannsgate 21

Phone: +47 23 35 15 00
Fax: +47 23 35 15 15
www.udi.no
E-mail: udi@udi.no

Last updated: 30.05.2007